



## **Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WAR-SAXAAFADEED 024/2009**

Nayroobi, 6 August 2009 - Ergayga Gaarka ah ee Qaramadda Mudooway u Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya Axmeduo Ould-Abdallah ayaa soo dhaweyey kulanka dhexmaray Xoghayaha Arrimaha Dibadda ee Dawladda Mareykanka, Hillary Radham Clinton iyo Madaxweynaha Soomaaliya Mudane Sheekh Shariif Sheekh Axmed.

"Shirka maanta ka dhacay Nairobi waa shirkii ugu muhiimsanaa. Wuxuuna waafaqsan yahay xoojinayaana mowqifka Urur Goboleed IGAD kan Midowga Africa, Kan Jaamacada Carabta, Kan Ururka Islaamka iyo kan Ururka Midowga Yurub ee dhamaantood ku wajahan Arrimaha Soomaaliya. Sidaas darteed, Shirkani wuxuu si cad u muujinayaa taageerada adag ee loo hayo Nabad iyo Xasilooni ku soo celinta Soomaaliya taasoo horeyba loogu sheegay heshiiskii Jabuuti" ayuu yiri Mudane Ould-Abdallah " Dawladu waxay u baahan tahay taageero xoog leh si ay u sii wado wadahadalada ay kula jirto qeybaha kala gedisan isla markaana ay horumariso arrimaha Nabadgelyada Umadda.

"Waxaa la gaaray wakhtii wadamada Aduunka, kooxaha kala gedisan, shaqsiyaadka iyo gaar ahaan kuwa qaswadayaasha ah ay muujin lahaayeen garowsho iyo xormada ay u hayaan Soomaaliya una kaalmeyn lahaayeen dadka Soomaaliyeed si ay dib ugu dhisaan bulshadooda iyo wadankoodaba. xurmeynta la xormeynaayo Somaaliya loolama jeedo in marwalba shirar jooqta ah un la qabto iyadoo lagu andacaanaayo Shir loo dhan yahay ayaa la qabanayaa,-kaasoo loo adeegsanaayo qaab mashruuc ahaan ah mar walba"

Mudane Ould-Abdallah wuxuu tilmaamay in dawlada hadda Soomaaliya ka jirta ay ka go'an tahay inay wadahadal kula sii wado wadanka gudhiisa dadka Soomaaliyeed, waxaa kale ee uu sheegay in ay hadda muhiim tahay in xukuumada lagu taageero siyaasadaas (In dadka lagula hadlo wadanka gudhiisa) loona baahneyn in jahwareer dambe wadanka lagu aburo, wadankaasoo umaddiisu ay mudo dheer dhibaato ku soo jirtay.

"Dadka Soomaaliyeed way ku xanuunsadeen waana ka daaleen khaska kaasoo burburiyey naftooda. waxaan aad ula yaabay sida dadka Soomaaliyeed oo dhan u aaminsan yihiin in ay u helaan iyaga iyo caruurtooda mustaqbalkooda oo ay nabadi ku dheehan tahay" ayuu yiri Ould-Abdallah. "Bulshada Caalamka waa in ayan hadda Umadda Soomaaliyeed hoos u dhigin".